Minnesota Department of Education

QAYBTA B OGAYSIISKA NIDAAMKA DHAWRITAANNADA XAQA AY WAALIDKA U LEEYIHIIN DUGSIGA GUUD EE ARDADA WAXBARASHADA KHAASKA

Macluudmaadka ku qoran buuggan waxaa loogu talagalay in ay warbixin iyo tusaalooyin guud ka bixiyaan xaqa waxbarashada khaaska iyo nidaamka dhawritaannada loogu talagalay waalidka dhalay caruur da'aaddooda ay tahay 3 illaa 21 jir marka loo eego sharciyada gobolka iyo kuwa federaalka. Qormadan waxa ay sharaxaysaa qaybo ka mida xaqa iyo dhawritaannada loogu talagalay waalidka ee hoosiimanaya Sharciga Shaqsiyaadka Nafoonimada Waxbarashada Qaba (Individuals with Disabilities Education Act-IDEA), hirgalinta xeerarka ee 34 CFR - Part 300, iyo sharciayda Minnesota iyo xeeraarka lagu dabbaqayo; ma aha liista dhammaystiran ama sharaxaadda xuquuqda. Ogaysiiskan ma aha mid galaya booska latashiga lala samayanayo qareen shaahaado u haysta xaaladdaada sharciyeed ee khaaska kuu ah. Qormadan ma aha mid loogu dawgalay in ay ku jiraan ku dabaqidda dhammaan sharciyada gobolka iyo kuwa fedeeralka ee samaysan, iyo in ay dhici karto in sharciga la baddalay tan iyo markii qormadan la soo saaray.

HORDHAC

Qormadan waxay bixinaysaa aragtida guud xaqa waalidka ay ku leeyihiin waxbarshada khaaska mararka qaarkoodna loo yaqaanno nidaamka dhawrista. Isla nidaamyadan dhawrista ah waxaa loo sameeyay ardada naafada ah ee gaaray da'da 18 jirka.

Ogaysiiska Nidaamka Dhawrista waa in adiga lagu siiyo ugu yaraan sanadkiiba mar. Waana in lagu siiyo:

1. Marka ugu horraysa ee ilmahaaga loo dirayo qiimaynta waxbarashada khaaska ama haddii aad adiga qiimaynta codsato;

2. Marka ugu horraysa ee aad dacwad Waaxda Waxbarashada Minnesota ka xaraysato (MDE) sanad dugsiyeedka;

3. Marka ugu horraysa ee aad ama degmada ka codsataan nidaamka dhagaysiga dacwad sanad dugsiyeedka ah;

4. Taariiqda ay degmada go'aamiso in ay baddasho meelaynta ardaygaaga ayada oo ardaygaaga dugsiga uga saarta sababa la xariira jabinta nidaamka aqlaaqda degmada; ama

5. Marka aad adiga codsatid.

OGASIISKA QORAAL HORE

Degmadu waa in ay adiga ku siiso ogaysiiska qoraal hore markasta oo ay soo jeedinayso in ay bilaawdo ama baddasho:

- tilmaanta aqoonsiga canuggaaga;
- qiimaynta iyo meelaynta waxbarashada canuggaaga;
- helitaanka waxbarashada guud ee lacag la'aan ah (FAPE) ee canuggaaga la siinayo; ama
- Marka aad ka noqoto oggolaashada adeegyada canuggaaga la siinayo oo qoraala iyo kahor inta aysan degmada joojin waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira ee canuggaaga.

Ogaysiiska qoraalka ah waa in la soo raaciyo:

1. Warbixinta sababta ay degmadu u soo jeedisay ama ku diidday in ay tallaabo qaaddo;
2. Sharaxaad sababta ay degmadu u soo jeedinayso ama ay ku diidayso in ay tallaabo qaaddo;
3. Sharaxaad sababta nidaamka qiimayn kasta, cabbirid kasta, xog kasta, ama warbixin degmadu ay u isticmaalayso in ay sal u noqoto soo jeedinta ama diidmada;
4. Warbixinta adiga, oo ah waalidka canugga dhalay, aad ilaalin ka haysatid nidaamkan iyo macluumadka ku saabsan sida aad koobiga ku heli karti bugga yar ee ka hadladaya nidaamka ilaalinta;
5. Ilaha aad adiga la xariiraysid sida aad ku heli lahayd gaargaar aad ku fahamto nidaamyadan dhawrista;
6. Warbixinta fursadaha kale ay kooxda IEP iskudayeen iyo sababaha ay fursadahaasi u diideen; iyo
7. Warbixinta xaalado kale ee qiimo u leh degmada fikradaheeda ama diidmadeeda.

Waxaa sii dheer weydiimo federaalka, ogasysiis qoraala ee hore waa in uu ku sheego waxaas, marka laga reebo meelaynta hore ee waxbarashada khaaska ee canuggaaga la siiyo, dugsiga degmada waxa uu sii wadi doonaa codsigii ahaa meelaynta canuggaaga, ama la siiyo adeegyada waxbarashada khaaska, waa haddii aadan degmada ogaysiin diidmadaada muddo 14 cisho gudahooda marka dugsiga uu kuu soo diro ogaysiiskii hore ee qoraalka ahaa. Degmadu waa in ay adiga ku siiso koobiga IEP markasta oo ay degmadu bilaabayso ama baddalayso macluumaadka IEP.

Ogaysiiska hore qoraalka ah waa in uu sheegaa, haddii aad adiga diiddo fikradda ama aad diiddo ogaysiiska hore ee qoraalka ah, waa in aad adiga haysatid fursad laguu qabto kulanka heshiisiinta, iyo in dugsiga degmadu uu kula socodsiiyo si kaloo lagu baddali karo qilaafkana lagu xalliiyo, ay ku jiraan

dhexdhexaadin iyo kooxda IEP loogu fududeeyo kulamada taaso hoosimaanaysa Minnesota Statutes qaybta 125A.091, Qodob hoosaadka 7-9.

MACLUUMAAD DHEERAADA

Haddii aad adiga caawimaad u bahaantahay fahamka mid kasta ee ka mida xaqa ama waxkasta ee ku saabsan canuggaaga waxbarashadiisa, fadlan la soo xariiiir maamulaha degmada waxbarashada khaaska ama qofka hoos ku qoran. Ogaysiiskan waa in lagugu siiyo afkaaga hooyo ama qaab kale ee aad dadka isku fahmaysaan. Haddii afka aad ku hadashid aysan ahayn luqad qoran, degmadu waa in ay qaaddo tallaabo ay ku turjumayso ogaysiiskan hadal ahan ama adeegsato siiyaabooyin kale. Degmadu waa in ay hubiso in aad adiga fahmayso dulucda ogaysiiskan iyo caddaymo qoraal ahaan u haysato in ogaysiiskan adiga lagugu siiyay qaab aad ku farmi kartid dulucda ogaysiiskan.

Haddii aad qabti su'aalo ama aad doonaysid faahfaahin dheeraada, fadlan la soo xariir:

Magaca: _____

Telefoonka: _____

Maclumaad dheeraada, waxa aad kala soo xariiri kartaa mid ka mida hayadaha soo socda:

ARC Minnesota (u doodidda shakhsiyaadka naafonimada koritaanka qaba)
www.thearcofminnesota.org
651-523-0823
1-800-582-5256

Minnesota Association for Children's
Mental Health
www.macmh.org
651-644-7333
1-800-528-4511

Minnesota Disability Law Center
www.mndlc.org
612-334-5970 (Deegaannada Twin Cities)
1-800-292-4150 (Minnesota oo idil)
612-332-4668 (Telefoonka dadka dhegaha culus)

PACER (Parent Advocacy Coalition for Educational Rights)
www.pacer.org
952-838-9000
1-800-53-PACER,
952-838-0190 (Telefoonka dadka dhegaha culus)

Minnesota Department of Education
www.education.state.mn.us
651-582-8689
651-582-8201 (Telefoonka dadka dhegaha culus)

BOOSTADA ELETRONIKADA

Haddii dusiga degmadaada uu waalidka siiyo fursadda ah in ay ogaysiiskan lagu siiyo iimail, waxa aad adiga dooran kartaa in aad hesho ogasiiskii hore ee qoraalka ahaa, nidaamka dhawritaanka ogaysiiska, ama ogaysiiska la xariira nidaamka sharciga la xariira dacwadda cabashada ee iimaylka lagu qaadayo.

OGGOLAASHADA WAALIDKA

Qeexitaanka Oggolaashada

Oggolaasho macnaheeda waxa ay tahay in adiga si buuxda lagugu siiyay macluumadka muhiimka ah ee la xariira hawlaha la doonayo in oggolaashada lagu helo, lagugu siiyo afkaaga hooyo, ama qaab kale ee isfaham loo soo maro. Si aad ku oggolaato waa in aad fahamtid iyo raalli ka tahay ayadoo qoraala fulinta howsha oggoolashadaadu lagu doonayo. Oggolaashadan qoraalka ah waa in ay ku qoranyihiin macluumaad kasta ee la siidaynayo iyo cidda loo siidaynayo.

Ka Noqoshada Oggoolaashada

Oggolaashadu waa mid qiyaar ah lagana noqon karo si qoraala marka la doono. Laakiin dib uga laabashada ma aha ka noqosho wax horay u dhacay; macnaha waa dib uga laabashada laguma diidi karo wax dhacay oo aad adiga oggolaasho laga hastay ee dhacay in oggolaashada la haystay iyo kahor in aadan oggolaashada dib looga laaban.

Marka Degmadu ay Shardi ku Tahay in ay Hesho Oggolaashadaada

A. Qiimaynta Hore

Degmadu waa in ay hesho qoraalkaaga iyo la soo wargaliyo oggolaashadaada kahor inta aan la bilaabin qiimaynta canuggaaga. Adiga ama degmadaada bilaabi kara codsiga bilowga qiimaynta. Haddii aadan adiga ka soo jawaabin codsiga oggolaashada ama haddii aad diidid in aad oggolaasho ku bixiso qiimaynta hore, degmadu kama ay horimaan karto diidmadaada ah in oggolaasho aad bixiso. Qiimaynta hore waxaa lagu qabanayaa muddo 30 cisho gudahood maalmaha dugsigas la dhiganayo laga bilaabo taariikhda ay degmadu oggolaashadada ku hesho in ay qiimaynta samayso, waa haddii aan la codsan shirar heshiisiin ah ama dhagaysi.

Degmada lama dhihi karo waxay jabisay sharciga ah in ay qanciso waxa canugga laga maarmaanka u ah ama waajibaadka ka saaran in ay ku fuliso qiiimaynta iyo dib u qiimaynta haddii aad adiga diido oggolaashada ama aad ka soo jawaabi waydo oggolaashada qiimaynta hore.

Haddii aad u fasaxdo in qiimaynta hore la qaado, oggolaashadan looma isticmaali karo in ay u dhigantahay helitaanka hore ee waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira.

B. Meelaynta Hore iyo Helitaanka Adeegyada Waxbarashada Khaaska iyo Adeegyada La Xariira

Degmadu waa in ay hesho oggolaashadaada hore ee qoraala kahor inta aysan bilaabin qiimaynta hore oo ay la socoto meelaynta hore ee canuggaaga ee waxbarashada khaaska ah iyo helitaanka hore adeegyada waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira ee canuggaaga lagu caddeeyay in uu yahay canug naafomino qaba.

Haddii aadan ka soo jawaabin oggolaashada codsiga, ama aad diiddo in aad fasaxdo qiimaynta helitaanka hore ee waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira ee canuggaaga la siinayo, degmadu ma buri/baddali karto diimadaada qoraalka ah.

Haddii aad diiddo in aad fasaxdo helitaanka hore ee waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira, ama aad ka soo jawaabi waydo codsiga lagu bixinayo oggolaashada helitaanka hore ee waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira, degmada ma ay noqon doonto midda sharciga ku jebisay in aysan canuggaaga siin waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira kuwaaso ay degmadu oggolaasho soo codsatay.

C. Dib-u-Qiimaynnada

Oggolaashadaada ayaa loo baahanyhay kahor inta aysan degmadu dib-u qiimaynta canuggaaga bilaabin. Haddii aad diiddo dib-u-qiimaynta, degmadu ma ay diidi karto diidmadaada hore ee qoraalka ah. Dib u qiimayn waxaa lagu qaban karaa muddo 30 cisho oo laga soo bilaabo maalinka ay dagmadu ay hesho oggolaashadaada ay ku samaynayso qiimaynta ama muddo 30 cisho gudahood laga bilaabo maalinka 14aad ee dhicitaanka muddada aad adiga ku diidi kartid degmada tallaabadeeda.

D. Adeegyada Kumeelgaarka

Ogggolaashadaada waxaa loo bahanayahay kahor inta aan loo siidayn macluumaad la aqoonsa karo saariikiisha ka socda hay'adaha ka qayb galaya bixinta adeegyada ama bixinaya adeegyada kumeelgaarka.

Marka Ogggolaashadaada aan Loo Baahnayn

Marka laga reebo qiimaynta iyo meelaynta hore iyo helitaanka waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira, haddii aadan degmada ku ogaysiin diidmadaada muddo 14 cisho gudahooda kaddib marka ay degmadu ay kuu soo dirtay ogaysiiska degmada fikradaheeda ay adiga kuu soo jeedisay, degmadu fikradaheeda waxa ay dhaqangalayaan xitaa ayadoo la haysan oggolaashadaada.

Waxaa si dheer in aan oggolaashadaada looga bahnayn degmada in dib u eegto xogta ku jirta galka canuggaaga waxbarashadiisa oo qayb ka ah qiimaynta iyo dib u qiimaynta.

Oggolaashadaada xitaa looma baahna in ay degmadu hesho si lagu bixiyo imtixaamka ama qiimayn kale ee la siinayo caruurta oo idil, waa haddii oggoolaasho aan looga baahnayn waalidka oo idili.

Waalidka Xaqiisa uu Ku Diidayo iyo Xaqa uu u Leeyahay Kulanka Dhexdhexaadinta

Xaq ayaad u leedahay in aad diiddo tallaabo kasta oo ay degmadu soo jeediso muddo 14 cisho gudaheeda kaddib marka ay degmadu kuu soo dirto ogaysiinta ee fikraddooda. Haddii aad diiddo degmada fikraddeeda, xaq ayaad u leedahay in aad codsatid kulanka dhexdhexaadinta, heshiisiin, fududaynta kulamada ee kooxda IEP ama dhagaysi sharciga loo marayo. Muddo toban cisho ee maalmaha la shaqeeyo laga bilaabo taariikhda ay degmadu hesho ogaysiiska didmadaada ee fikradaheeda ama diidmada degmada ogaysiiskeedii hore, degmadu waxa ay ku weydiin doontaa in aad ka qayb gasho kulan dhexdhexaadin ah.

Marka laga reebo sida ku qoran qaybta Xeerarka Minnesota qodobka 125A.091, kulamada wadahadallada oo idil waa kuwo asturan mana noqon karaan kuwo la horkeeni karo dacwad maxkamadeed. Muddo shan cisho ah kaddib marka uu dhaco kulanka ugu dambeerya ee dhexdhexaadinta, degmadu waa in ay bilawdo in ay diyaariso adigana ku siiso bayaan kulanka heshiisiinta ee sharaxaya fikradeeda ku aaddan adeegyada. Bayaankan waxa uu noqonayaa mid dacwad lagu cuskanayo.

Adiga iyo degmada waxa aad ku heshiin kartaan in aadn dhexdhexaadin isticmaashaan, ama shir ay kooxda barnaamijka waxbarashada (IEP) shaqsiyeed soo diyaarisay. Adiga iyo degmada waxaa kale ee aad codsan kartaan dhagaysi maxkmad (dhinaca dambe ee qormadan eeg qaybta ku saabsan Dhagaysi Dacwad Caddaalad ah). Degmadu waa in ay sii bixiso waxbarasho canuggaaga ku habboon muddada u dhagaysiga kasta ee maxkamad caddaalad ay socoto.

Asturnaanta iyo Macluumaadka Shaqsiyeed ee La Aqoonsan Karo

Macluumaadka shaqsiyeed ee soo baxaya waa macluumaad ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn, ardayga magaciisa, magaca waalidka ardayyga ama xubno kale ee qoyska, cinwaanka ardayga ama waalidka ardayga ama xubno kale ee qoyska, wax shaqsiga lagu aqoonsanayo, sida ardayga Soshal Sikuuradkiisa, lambarka ardayga, ama lambarka xogta dhalashada, aqoonsiyo kale ee dadban, sida ardayga taariikhdiisa dhalashada, meesha dhalashada, hooyada magaceeda qoyska, macluumaad kale, kaligii ama wax lagu daro, la xariira ama aan lala xariirin karo arday qaasa ee saamixi karta qof macquula ee ka shaqeeya dugsiga ama jaaliyadda ka tirsan, oo aan aqoon gaar u lahayn xaaladda meesha ka jirta, uu si sax ku aqoonsan karo ardayga, ama macluumaad uu codsaday qof ay hay'adda ama machadka waxbarashada ay si macquula uu u rumaysanyahay in uu yaqaanno aqoonsiga ardayga ay xogta waxbarashada qusayso.

Degmooyinka iyo MDE waa in ay ilaaliyaan asturnaanta xog kasta ee shaqsiga lagu aqoonsanayo, macluumaadka, iyo xogta ay ayaga aruuriyaan, kaydiyaan, siiwaada ama burburiyaan.

Guudahaan, oggolaashadaada oo qoraala ah ayaa loo baahanyahay kahor inta aysan degmadu ay dhici karto in ay siidayso macluumaad gaar ee la aqoonsan karo ee ku jirta xogta waxbarashada canuggaaga ay la wadaagayaan marka laga reebo shaqaalaha hay'adaha macluumaada aruurinaya ama macluumadka u isticmaalaya sharciga hoosimaanaya Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafonimada Qaba (Individuals with Disabilities Education Act - IDEA) ama ujeeddo kasta ee kale aan ahayn waxa sharciga qancinaya.

Marka aan oggolaashahaaga loo baahnayn si lagu wadaago macluumaad gaara ee la aqoonsan karo. Oggolaashadaada, ama oggoolaashada ardayga u qalma (18 jir ama ka weyn), looma baahna

kahor inta uu jiro macluumaad gaara ee la aqoonsan karo loo siiidayo shaqaalaha dugsiga degmada ama waaxda waxbarashada ee shuruudaha IDEA qancinaya.

Canuggaaga xogtiisa waxbarashada, oo ay ku jiraan xogta aqlaaqda, ayadoo oggolaashadaada loo baahnayn ayaa loo gudbin karaa masuliyiinta dugsi kale, degmada, ama machad waxbarasho sare haddii canuggaaga uu rabo in uu isku qoro ama aado dugsiga ama machadka degmadaas.

Siidaymaha lagu bixinayo ayadoo loo baahnayn oggolaashadaada waa in ay tahay mid lagu fasaxayo Xeerka Xuquuqda ee Waxbarashada Dhowrsan (Family Educational Rights and Privacy Act -FERPA). Fadlan tixraac 34 C.F.R. Part 99 si macluumaad dheeraada ee ku saabsan xeerarka ku saabsan xogta gaar ah ee sharciga federaalka hoosimaanaya.

Diiwaanka Macluumaadka

Diiwaanka macluumaadka waxa lala waadaagi karaa ayadoon aan oggolaashadaada la haysan. Macluumaadka noocan ah waa xog ku jirta xogta waxbarashada canuggaaga oo caadi aysan wax dhiibaata ka uga imaayn ama wax xadguduba lagu samaynayn haddii la siidaayo.

Diiwaanka macluumaadka waxaa ka mida, balse aan ku koobnayn, cinwaanka ardayga, telefoon lambarka, cinwaanka iimailka, taariiqda iyo meesha dhalashada, maaddada uu ku takhasusayo, heerka darajada, sugitaanka isku qorista, taariiqaha xaadiriska, ka qayb qaadashada rasmiga ee hawlaha iyo isboortiga, culayska iyo dhererka xubanaha kooxda cayaaraha, halbeegga, ammaanada, iyo abaalmarinnada la mutaystay, hayadda waxbarashada ama dugsiyada la dhigtay ee u dambeeyay, iyo lambarka AQOONSIGA ardayga, AQOONSIGA la isticmaalo, ama wax si gaara lagugu aqoonsanayo ee lagu isticmaalayo si loo adeegsado ama si eletroonig lagula xariirayo haddii ay jiraan in sifooyinka qaarkood la qanciyay. Diiwaanka macluumaadka laguma darayo lambarka Sooshal Sekuuritiga iyo lambarka AQOONSIGA ee aan lagula isticmaalin adeegsashada ama si eletroonig ah lagula xariirayo sida uu qorayo sharciga federaaliga.

Degmooyinka waa in ay ku siiyaan fursadda diidmada si aad degmadu ugu oggolaatid doorasho kasta ama xogta oo idil ee ku saabsan ilmahaaga diiwaanka macluumaadka. Ogaysiiskan waxaa lagu siin karaa si kasta ee suurtagala ay laasimayso in lagula socodsiiyo ama arday u qalma xaqaan. Haddii aadan diidin in aad siidayso macluumaadka kor ku xusan mucluumaadka diiwaan ahaan, macluumaadkaa waxaa loo qaadanayaa xog guudahaneed iyado lala waadaagayo ayadoon lagaa haysan oggolaashadaada. Haddii aadan diidin in aad siidayso macluumaadka kor ku xusan mucluumaadka diiwaan ahaan, macluumaadkaa waxaa loo qaadanayaa xog guudahaneed iyado lala waadaagayo ayadoon lagaa haysan oggolaashadaada.

Xogta adiga kugu saabsan (macnaha waalidka) waa xog gaara laakiin waxaa loo isticmaali karaa sida macluumaad diiwaanka ku jira haddii isla nidaamkaa ay isticmaasho degmo loo xilsaaray in xogta ardayga sida macluumaadka diwaanka oo la raacay

OGASIISKA QORAAL SANADEEDKA EE DHINAC SADDEXAAD QUSEEYA QAANSHEEGGA BIILASHA ADEEGYADA IEP CAAFIMAADKA LA XARIIRA

Kahor inta aysan marka koobaad u qansheegan Gargaarka Caafimaadka ama MinnesotaCare arrimo la xariira adeegyada caafimaadka, iyo sanad walba, degmada waxaa shardi ku ah inay qoraal kula socodsiiso in:

1. Degmadu waxay la wadaagi doontaa xogta la xariirta canuggaaga iyo adeegyada daryeelka caafimaadka ee canuggaaga IEPgiisa Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota si lagu ogaado haddii canuggaaga uu caymis ka haysto Gargaarka Caafimaadka ama MinnesotaCare iyo haddii adeegyadaas loogu qaansheganayo Gargaarka Caafimaadka ama MinnesotaCare.

2. Kahor inta aysan marka koobaad u qansheegan Gargaarka Caafimaadka ama MinnesotaCare arrimo la xariira adeegyada caafimaadka, degmadu waa inay hesho oggolaashadaada, ay ku jiraan in la caddeeyo xogta gaarka ee la aqoonsanayo ee la siidayn karo (tusaale; diwaannada ama xogta ku saabsan adeegyada ay dhici karto in la bixiyo), ujeeddada siidaynta, hay'adda siidaynta ay dhici karto inay samayso (tusaale; Waaxda Adeegyada Aadanaha) iyo taaso caddaynayso in aad fahamtay raallina ka tahay in dugsiga degmada uu adeegsan karo nacfigaaaga (ama canuggaga nacfgiigiisa) guud ama caymiska lagu bixinayo adeegyada caafimaadka la xariira.

3. Degmadu waxay qaanshaganaysaa Gargaarka Caafimaadka ama MinnesotaCare adeegyada caafimaadka la xariira ee IEPga canuggaaga.

4. Waxaad dhici karta in aannu degmada u baahnayn in aad saxiixdo ama isku qorto Gaargaarka Caafimaadka ama MinnesotaCare ama barnaamiyada caymis kale si canuggaaga uu ku helo adeegyada waxbarashada khaaska ah.

5. Waxaa dhcii karta in aannu degmada u baahnayn kharash la doonayo in aad adigo bixiso sida bixinta hormariska ama lacag la bixinta ku baxay xaraynta dacwad adeegyada caafimaadka ee la bixiyey, balse ay bixin karto kharash la dhihi karo adiga lagaa rabo in aad bixiso.

6. Degmada ma ay isticmaali karto nacfiga canuggaaga ee hoosimaanaya Gargaarka Caafimaadka ama MinnesotaCare haddii isticmalka uu noqdo: dhimis la xariirta caymiyeyn inta la noolyahay kabaysa ama nacfi kasta ee kale caymis ah; ay sababto in qoyskaaga uu bixinayay kharashka adeegyo loo baahna in laga bixiyo nacfiga guud ee kabaya ama barnaamijka caymiska iyo loo baahnaa in la siiyo canug dugsiga dibadda ka jooga waqtigii canuggaaga uu dugsiga aadayay; ama xalis u noqotid in aad ku weydo xaqaaga aad u leedahay saamaxaadyo la xarira guriga ama kuwo jaaliyadda ku salaysan, kuwaaso ku salaysan isgudaryo kharashyo caaafimaadka la xariira.

7. Xaq waxaad u leedahay in lagu siiyo koobiga xogta waxbarashada ay degmadu la wadaagtay dhinac saddexaad marka ay doonaysay in dib-u-bixinta kharashyada IEP ee caafimaadka la xariira.

Waxaad xaq u leedahay in aad joojiso oggolaashahaaga siidaynta xogta waxbarashada canuggaaga ee dhinac saddexaad u jeedda, ay ku jirto Waaxda Adeegyada Waxbarashada, waqti kasta. Haddii

aad joojiso oggolaashada, degmadu ma la sii wadaagayso xogta waxbarashada canuggaaga si ay ugu qaansheegato dhinac saddexaad adeegyada caafimaadka la xariira ee IEP. Oggolaashahaaga waa aad la laaban kartaa waqti kasto aad doonto, iyo in annu marnaba la baddalayn ama la jojinayn adeegyada IEP ee canuggaaga la siiyo.

QIIMAYNTA WAXBARASHASHADA MADAXBANNAAN

Qiimaynta waxbarashada ashada (IEE) waa qiimayn ay bixiyaan dad (qof) ku taqasusay qiimaynta oo aan ahayn shaqaalaha degmadaada. Waxa aad weydiisan kartaa dugsiga degmadaada IEE iyadoo dugsiga degmaduna qarashka uu dhiibayo haddii aadan ku raacsanayn qiimaynta degmada. Sarkaalka dhagaysiga ayaa dhici karto in uu xitaa amri karo qiimaynta wabarashada madaxabannaan iyadoo dugsigu bixinayo kharashka ku baxa inta dacwadda dhagaysiga ay socoto.

Kaddib marka la codsado IEE, degmada waa in ay ku siiso macluumaad ku saabsan waxa ku salaysan qaabkeeda doorashada ee baare madaxbannaan iyo halka laga heli karo macluumaadka ku saabsan qiimaynta waxbarashada madaxabannaan.

Haddii aad codsatay IEE, degmadu shardi ayay ku tahay, ayadoon daahid lahayn, in ay bixiso ayado isticmaalaysa dhaqaalaha dawladda ama ay codsato dhagaysi ay ku go’aaminayso ku habboonaanta qiimaynteeda. Haddii degmadu ay dhagaysi dalbato iyo sarkaalka dhagaysiga uu ku raaco in qiimaynta degmada ay sax tahay, weli waxa aad xaq u leedahay qiimayn xor ah, laakiin waa mid aysan dawladda bixinayn.

Haddii aad heshid IEE, natiijooyinka ka soo baxa qiimaynta waa in ay ahaataa mid qaddarin ka haysata Kooxda IEP/IIIP (Qorshaha Dhexgalka Shaqsiga ee Hayadaha Dhaxdooda) waxaana loo soo bandhigi karaa caddayn dhagaysiga dacwadda ee ku saabsan ilmahaaga.

XOGTA WAXBARASHADA

Qeexitaanka Macluumaadka Waxbarashada

Waxa xoojinaya sharciga feedeeraliga ee xogta waxbarashada macnaheeda waxay tahay macluumadkaas sida tooska la xariira canugga iyo in waaxda ama degmada ay hayso.

Adeegsashadaada Xogta

Haddii aad doonaysid in aad eegtid xogta waxbarashada ilmahaaga, degmadu waa in ay ku siisaa fursad aad xogtaasi ku isticmaashi dib u eegashadaada. Xogta waxabarasahda waxaa ka mida macluumaadka badankiisa ee ku saabsan ilmahaaga ee u dugsiga hayo. Laakiin, macluumaadka uu kaligooda hayo baraha ilmahaaga ee la xaariira isticmaaliddiisa ama isticmaaliddeeda waxbarashada lagama yaabo in lagu daro xogta waxbarashada.

Degmadu waa in ay kuu oggolaato in aad eegtid xogta ayada oo aan loo bahnaayn dib u dhac, iyo inta in aan la qaban kulan kasta ee la xariira IEP, ama dhagaysi kasta ama kulan go’aamin ah ee canuggaaga ku saabasan. Waxaa sii dheer, in degmadu in ay fuluso codsigaaga aad dib u eegaysid xogta macluumaadka waxbarashada ilmahaaga sida ugu dhaqsiya badan, haddii ay suurtogal tahay, ama muddo 10 cisho dhexdooda laga bilaabo taariiqda la codsaday (laga reebo Sabtiyada, Axadaha iyo fasaxyada sharciga ah), haddii adeecid deg-dega aanaay suurtogal ahayn.

Xaqa aad u leedahay in aad baartid iyo dib u eegtid waxaa ku jira xaqa aad u leedahay:

1. Fasiraadda iyo macnaynta xogta ilmahaaga marka sidaa lagu codsado;

2. Waa in aad wakiilkaaga baaro iyo dib u eego xogta asaga oo adiga ku metelaya;

3. Codsatid in degmadu ay ku siiso koobiyada xogta waxbarashada ilmahaaga; iyo

4. Dib u eegtid xogta ilmahaaga inta jeer ee aad rabto ayado la dhawrayo sharciga. Sharciga gobolka ayaa ballanqaadaya haddii adiga lagu tusay xog gaar ah iyo macnaheeda lagu sheegay, in xogtaas aysan u baahnayn in la siidayo muddob 6 bilood ah waa haddii usan dhicin muran ama tallaabo laga qaadayo ama maclumaad cusub laga sameeyay ama laga aruuriyay.

Gudbinta Xuquuqda

Xuquuqdada la xariirta helitaanka xogta canuggaaga waxbarashadiisa caadi ahaan waxay u gudbaysaa canuggaaga marka uu 18 jirsado. Ogaysiiska waa in adiga iyo canuuggaaga la siiyo waxa la xariira isdahaafsashada xuquuqda.

Xogta ka Badan Hal Canug

Xogta waxbarasha kasta waa in ay ku jirto macluumaad hal canug ka badan la xariira, waxa aad xaq u leedahay in aad baarto iyo dib u eegto macluumaadka canuuggaaga keliya la xariira. Waxa aad raadin kartaa oggolaashada aad dib ugu eegaysid iyo ku baarasayd xogta waxbarashada ay ku jirto maculaamaadka ku saabatsan caruurta oo ay sii dheertahay kaaga, laakiin waalidka kale waxa ay xaq u leeyihiin in ay diidaan codsigaaga oggolaashaha.

Liistada Noocyada iyo Meelaha Macluumaadka laga Helo

Kaddib marka codsigaaga aad samaysid, degmadu iyo waaxdu waa in ay kuu soo gudbiyaan liistada noocyada iyo meelaha xogta waxbarashada laga aruuriyo, lagu hayo ama lagu isticmaalo.

Xogta ay Dad Kale Adeegsanayaan

Demgadu waa in ay diwaangaliso codsi xog kasta ee la isticmaalo, iyo siidayn kasta, ee si shaqsi ah macluumaadka lagu aqoonsan karo ilmahaaga xogtiisa waxbarashada. Isticmaalka xogtan waa in uu ka mid noqdo magaca qofka wax codsaday ama la siiyay macluumaad lagu aqoonsan karo xogta waxbarashada ilmahaaga, iyo qasdiga siidaynta ama danaha u xaqa ugu leeyahay macluumaadka.

Oggolaashada Siidaynta Xogta

Guudahaan, oggolaashadaada waalidka ayaa loo baahanyahay kahor inta aan macluumaadka shaqsiyeed ee qofka lagu ogaanayo loo siidayn cid ama hay’ado aan fasax u haysan. Oggolaashada waa in ay ahaato mid qoraala iyo lagu xaqiijiyo shaqsiga ama hayadaha loo fasaxay in ay macluumaadka helaan: dulucda macluumaadka la siidaynayo; ujeeddada maclumaadka loo isticmaali karo; iyo waqtiga ay isticmaalka macluumadka la fasaxayo uu ku egyahay. Kaddib markii la codsado, degmadu waa in ay ku siiso koobiga maclumaadka ay siidaysay marka aad adiga u siidaysay oggolaashdan.

Degmadu uma ay siidaynayso malcumaad ku jira IEP/IIEga ilmahaaga, oo uu ka mid yahay cudursheegga iyo macluumaadka daawaynta, ee la siinayo shirkad qorshe caafimaad ayada oo aan laga haysan saxiixa oggolaashadaada.

Ujrooryinka ku Baxaya Raadinta, Dib u Helidda iyo Nuqul ka Samaynta Xogta

Degmadu wax ujra kaama ay qaadayso raadinta ama dib u helidda xogta. Laakiin haddii aad codsato nuqullada, waxaa dhici karta in aad bixisid ujro caqligala, waa haddii aysan ujrada noqon mid ka hortagaysa xaqa aad u leedahay in ay ku fuliso dib u helidda iyo dib u eegidda xogta waxbarasahada sababtoo ah in aadan awood u lahayn in aad lacag bixiso.

Baddalidda Xogta ee Waalidka Codsigiisa

Haddii aad rumaysantahay in macluumaadka xogta ilmahaaga uu qalad yahay, been ah, dhammaystirnayn ama lagu jabinayo asturnaanta ilmahaaga ama xuquuqda kale, waxa aad codsan kartaa in degmadu ay xogta wax ka baddasho ama meesha ka saarto.

Degmadu waa in ay go'aan ku gaarto muddo caqligala haddii ay xogta wax ka baddalayso. Haddii degmagu ay wax ka baddali weydo xogta, waa in ay kuu sheegto go'aanka iyo ay kula socodsiisaa xaqa aad u leedahay xaraysiga dacwad ka dhana degmada go'aankeeda. Haddii, kaddib marka ay natiijo soo baxdo dhagaysiga, ay degmadu go'aansato macluumaadka in uu yahay mid qalad ah, been ah, ama yahay mid jabinaya xogta canuga gaarka u ah, waa in ay kula socodsiiso in aad xaq u leedahay in aad soo raacisid warbixin fikraddaada ama diidmadaada ku saabsan iyo ay la socoto ka hortagid qaybta macluumaadka ee xogta waxbarashada canuggaaga. Dhagaysi looga hortagayo macluumaadka waxbarshada waa in la qabto ayadoo la dhawrayo nidaamka dhagaysiga ee FERPA.

Wareejinta Xogta

Sharciyada Minnesota waxa ay dhigayaan in degdmada, dugsi jaartar ah, ama dugsi madax bannaan wareejinta waxbarashada ardayga xogtsiisa, ay ku jirto xogta aqlaaqda, in loo wareejiyo dugsiga lagu qorayo laga bilaabo dugsiga uu ardayga uu isku qorayo muddo 10 cisho gudahooda ee wax lagu codsaday.

Burburinta Xogta

Degmadu waa in ay kula socodsiiso marka maclumaad qofka lagu aqoonsan karo aan loo baahnayn si loo siiyo adeegyada waxbarashada canuggaaga. Macluumaadkaas waa in la burburiyo marka aad sidaa ku codsatid. Laakiin, dugsigu waxaa dhici karta in uu reebto macluumaadka weligood meesha lagu haynayo sida, ilmahaaga magacsiisa, cinwaanka, telefoon lambarka, darajooyinka, xogta isxaadirinta, fasallada uu qaatay, heerka darajada la dhammeeyay iyo sanadka la dhammeeyay.

Marka sharciga federaaliga loo eego, burburinta macnaheeda waxaa laga wadaa ka saaridda dhab ahaan wax kasta ee sheegi kara aqoonsiga gaarka ah ee macluumaadka si markaasi macluumadka aanu u noqon mid shaqsiga xogtiisa aan la aqoonsan karin Sidaa awgeed, ardayga xogtiisa uma baahna in si dhaba loo burburiyo si codsigaaga lagu aqbalo ee aad ku codstay in xogtaasi la xariirta waxbarashada la burburiyo. Degmooyinka sida laga rabay ayay ku adeeci karaan codsigaan oo si cad uga saara macluumaadka shaqsiyeed ee la aqoonsan karo ardayga xogtiisa. Nidaamka doorashada burburinta waa wax u degsan degmada dusiga.

Degmadu ma ay burburin karto macluumaad kasta haddii uu codsi baaritaan ama mid dib loogu eegayo xogta uu u maqanyahay.

Ayadoo la hayo wax codsigaaga lagu burburinayo xogta ay dhici karto in degmadu ay reeban karto qaar ka mida xogtaa ee u baahan in lagu dhawro Nidaamka Guud ee Waxbarashada General Education Provision Act (GEPA), kuwaasoo u baahan in qofka qaadanaya dhaqaalaha federaalka u sii haysto xogta la xariirta haysashada dhaqaalahaas. Waxaa aad doorbidi kartaa in aad sii haysato qaar ka mida xogta waxbarashada qaarkeeda ee ku saabsan warbixinta qoraalka ee ujeeddoyinka mustaqbalka ah laga yeelan karo, sida marka waxtarka SSI la dalbanayo.

DHEXDHEXAADINTA

Dhexdhexaadintu waa lacag la'aan, hab qiyaari ah ee lagu xallinayo qilaafaadka. Adiga ama degmadadaa waxa aad dhexdhexaadin lacag la'aan ah ka codsan kartaan Waaxda Waxbarashada Minnesota Adeegyada Dhexdhexaadinteeda Waxbarashada Khaaska ee laga wacayo 651-582-8222 ama 1-866-466-7367. I Dhexdhexaadinta waxaa la isticmaalayaa dhinac saddexaad ee dhanna raacsanayn ee loo tababaray xallinta qilaafaadka laysku haysto. Dhexdhexaadintu looma isticmaalayo in laguugu diido ama dib loogu dhigo xaqa aad u leedahay dacwad dhagaysi. Labadiinaba adiga iyo shaqaalaha degmada waa in aad iskudaydaan dhexdhexaadin inta aan dhexdhexaadiye la magacaabin. Inta ay dhexdhexaadintu socoto, adiga ama degmada waxa aad joojin kartaan dhexdhexaadinta.

Haddii adiga iyo degmada aad isku afgarataan dhammaan ama qayb ka mida murnaka ama aad ku wada heshiisaan in aad qaab kale ee muranka lagu xallinayo isticmaashaan, dhexdhexaadiyaha waxa uu hubinayaa in go'aanka ama heshiiska uu ahaado mid qoraala ayna adiga iyo degmadu saxiixaan iyo ladabada dhinacba koobiga dukumiintiga la siiyo. Go'aanka ama heshiiska qoraalka ah waa in u si cad wadahadallada idil oo dhacay inta ay dhexdhexaadinta socotay ay ahaadaan kuwo qarsoodi ah loomana isticmaali karo in qayb ka noqdaan caddayn dhagaysi kasta ama dacwad madani ah. Go'aanka ama heshiiska waa mid sharciyan ka jira labada dhinacna adiga iyo degmada lagana fulin karo maxkamadaha degmada gobolka iyo kuwa federaalka. Adiga iyo degmada waxa aad codsan kartaan dhexdhexaadin kale ee fulintahe heshiiska dhexdhexaadintalagu xallinayo.

QORAALKA XARAYNTA DACWADDA

Hay'ad ama shakhsi kasta waxuu xaraysan karaan dacwad ku jeedda Waaxda Waxbarashada Minnesota (MDE). Dacwadda loo dirayo MDE waa in ay ka mid ahaadaan:

1. Kuwo qoraala oo ay saxiixeen shakhsiga ama hay'adda dacwadda xaraynayso;

2. Sharci jebinta lagu andacoonayo ee la xariira sharciga ama qawaaniinta waxbarashada khaaska ee gobolka ama federaalka;

3. Lagu qoro caddaymaha waxa ay ku salaysanyihiin falalka lagu andacoonayo;

4. Uu ka midyahay magaca, lambarka cinwaanka iyo telefoonka ee qofka ama hay'adda dacwadda samaynaysa;

5. Uu ka midyahay magaca iyo cinwaanka guriga ay ilmaha degganyihiin iyo magaca dugsiga ay ilmuhu aadaan;

6. Warbixinta ku saabsan dhibka ilmaha haysta; ay ka mid yihiin caddaymo la xariira dhibka;

7. Heshiiska la soo jeediyay ee dhibaatada la xariirta inta la ogyahay iyo la siin karo dhinaca waqtiga dacwadda la xaraynayo: iyo

8. Loo dirayo hay'adda guud ee adeegyada canugga bixisa isla waqtiga cabashada loo diray MDE.

Cabashadu waa in loo diro:

Minnesota Department Education
Division of Compliance and Assistance
Due Process Supervisor
1500 West Highway 36
Roseville, MN 55113-4266
651.582.8689 Telefoonka
651.582.8725 Fakiska

Dacwaddu waa in ay MDE ku hehso waqti aan ka dambayn hal sano kaddib marka ay dhaceen falalka laga dacwoonayo. MDE waxa ay soo saari doontaa go'aanka oo qoraala muddo 60 cisho gudaheeda, waa haddii aysan jirin xalaado u bahaan muddo sii dheer ama adiga ama degmada aad ku heshiiseen in muddada ka qaybqaadashda dhexdhexaadinta la sii kordhiyo. Go'aanka cabashada ugu dambeysa adiga (oo waalidka ah) ayaa racfaan ka xeraysan karaa Maxkamadda Racfaanka ee Minnesota (Minnesota Court of Appeals) ama dugsiga degmada oo siidayay xog laga rabay ay difaacdo go'aanka muddo 60 cisho gudahood kaddib marka ay hesho ogaysiiska go'aanka kamadambeysta ah.

MUUQAALKA FOOMANKA

MDE waxa ay soo diyaarisay muqaalka foomanka ee lagu isticmaali karo xaraynta cabashada waxbarashada khaaska ama dacwad sharciga ah. Foomankan qasab maaha, laakiin waxaa loo isticmaali karaa sida cabashada lagu xaraysan karo. Foomankan muuqaalkooda waxa lagu diyaariyay bogga foomaanka shabakadda internetka MDE ee nidaamka sharciga la marayo ee laga galayo: MDE > School Support > Compliance and Assistance > Due Process Forms.

DHAGAYSIGA DACWADDA CADDALADEED

Adiga iyo degmada labadiinaba waxa aad xaq u leedihiin in aad codsataan dhagaysi caddalada ee qoraala muddo laba sano ee laga soo wareego tariikda aad adiga ama degmada ogaateen ama loo baahnaa in aad ogaataan waxa ku saabsan falka dhacay ee sal u noqonaya cabasho dacwad caddaalada.

Dhagaysiga dacwad caddaalada waxaa lagu codsan karaa sababo la xariira codsi diidmo lagu bilaabayo ama lagu baddalayo canugga qiimayntiisa, IEP, meelaynta waxbarashada, ama FAPE lagu bixinayo.

Dhagaysa dacwad caddalada waxa laga hadlayaa xaalad kasta ee la ariirta aqoonsiga, qiimaynta, meelaynta waxbarashada, fikradda go'aanka ama helitaanka waxbarashada lacag-la'aanta ah iyo mid ku habboon ee canuggaaga waxbarashadiisa. Muddo 15 cisho gudahooda kaddib marka aad hesho ogaysiiska dacwadda ee nidaamka cabashadaada, iyo kahor dhagaysiga dacwadda, dugsiga dawladda waa in uu adiga kuu qabanqaabiyo kulan xal u helista iyo xubanaha kale ee qiimaha leh ee Kooxda IEP ee aqoon u leh dhacdooyinka lagu andacoonayo dhagaysiga dacwadda cabashada.

Ujeeddada kulankaan waa wax adiga kuu yaalla si looga hadlo dhagaysiga dacwadda cabashada, iyo in dhacdooyinka sal u noqonaya dhagaysiga dacwadda cabashada, si markaasi dugsiyada ay fursad u helaan sida lagu xallinayo qilaafka ee sal u noqonaysa dhagaysiga dacwadda cabashada.

Kulanka xal u helista uma baahna in la qabto haddii adiga iyo dugsiga degmada aad heshiis qoraala juga maarantaan kulanka ama dhexdhexaadin ku heshiisaan. Kulanka xal u helista looma baahna in la qabto marka degamada ay tahay dhinaca codsanaya dhagaysiga dacwadda cabashada.

Haddii xaaladda aan lagu afjarin muddp 30 cisho gudahooda kaddib marka la helo rasiidka dhagaysiga dacwadda cabashada, waxaa bilaabanaysa muddada ay dacwadda soconayso.

Haddii dugsiga degmadu uusan heli karin ka qaybqaadashadaada kulanka xal u helista ama dhexdhexaadinta muddo macquula dabadeed dadaallo la sameeyay iyo dugsiga degmadu aysan oggolaan heshiiska ay kaga maarmayaan kulanka oo qoraala, dugsiga degmada waxaa laga yaabaa, kaddib marka muddada 30 cisho ay dhammaato, in ay codsato in sarkaalka dacwadda uu dhagaysiga dacwadda cabashada burburiyo.

La Waayo Xaqa loo Leeyahay Dhagaysiga Dacwadda

XUSUUS: Sida Maxkmadda Racfaanka Degmada 8aad (8th Court of Appeals) ay u turjmayso sharci goboleedka, haddii canuggaaga uu dugsiga baddasho iyo aadan codsan dhagayigsa dacwadda kahor inta uusan canuggaaga isku qorin degmo cusub, waxaa dhici karta in aad wayso xaqa aad u leedahay dhagaysiga dacwadda ee ku saabsan xaalad kasta ee waxbarashada qaaska ee ka soo baxday degmadii hore. Waxa aad weli xaq u leedahay in aad ku codsatid dhagaysiga dacwadda ee ku saabsan waxbarashada qaaska ee ka imaan karto degmada cususb halka canuggaaga uu dugsiga ka dhigto.

Qaababka lagu Bilaabayo Dhagaysiga Dacwadda

Kaddib marka ay hesho codsiga dhagaysiga oo qoraala, degmadu waxaa shardi ku ah in ay kuu siiso ogaysiiska nidaamka dhawritaanka xuquuqda iyo koobiga xuquuqdaada ee dhagaysiga. Haddii adiga ama degmada aad codsataan dhagaysi, dhinaca kale waa in la siiyo koobiga codsiga iyo codsiga la horgeeyo waaxda. Mar haddii la hasyto codsiga, waaxdu waa in adiga ay ku siiso koobiga ogaysiiska u hoggaansanaanta nidaamka. Qoraalka codsiga oo idili waa in ay ku jiraan:

1. Magaca ilmahaaga;

2. Cinwaanka uu ilmahaaga degganyahay;

3. Magaca dugsiga uu ilmahaagu dhigto;

4. Ka warbixinta dhibaatooyinka, ay ka midyihiin aragtidaada caddaymaha: iyo

5. Tallaabada la soo jeediyay ee lagu xallinayo dhibaatada illaa heerka aad waqtiga ka ogayd.

MDE waxaa ay sii haysaanaysaa liistada saaraakiisa dhagaysi ee qibrad leh. Kaddib marka la haysto rasiidka codsiga dhagaysiga, MDE waxa ay ka magacaabi doonta liistada si dhagaysiga lagu qabto. Hoos waxaa ku qoran xaqa aad u leedahay dhagaysiga. Tan maaha liistada dhammaystiran ee xuquuqdaada.

Adiga iyo degmada labadiinaba waxa aad xaq u leedihiin:

1. Uu kula socdo iyo kula taliyo qareen iyo shaqsiyaad aqoon ama tababar gaara u haysta dhibaatooyinka caruurta nafoonimada qaba;

2. Caddaynta la horkeeno ama laga horgeeyo, marag furid iyo lagu qasbo marqaatiyaasha in ay soo xaadiraan;

3. Laga hortago caddayn kasta ee aan dhagaysiga loo gudbin shaacana laga qaadin ugu yaraan muddo shan cisho kahor inta aan la qaban dhagaysiga, ay ku jiraan xogta iyo talooyinka ku salaysan xogtaa: iyo

4. La helo nuqul lacagla'aana ee qoraalka dhagaysiga ama duubista elektronika helista caddaymaha iyo go’aamada.

Waalid ahaan, waxa aad qaasatan xaq u leedahay in:

1. In aad ilmahaaga, oo ah shakhsiga ay dacwaddu qusayso, uu xaadir ka yahay dhagaysiga;

2. La furo dhagaysi dadwaynaha u furan: iyo,

3. La haysto xogta ama qoraalka dhagaysiga iyo sarkaalka dhagaysiga helistiisa caddaymahiisa, dhammaystiridda sharciga iyo go’aamada adiga lagugu siiyay iyado wax lacaga kaaga bixin.

Ka Jawaabidda Codsiga Dhagaysiga

Haddii aad codsi ka xaraysato dhagaysiga iyo haddii aadan kahor ka helin ogaysiiska hore ee qoraala degmada ee ku saabsan mowduuca laysku haysto ee codsiga dhagaysiga, degmadu waa in ay kuu soo dirto qoraal sharraxaya sababta ay degmadu ku diidday in ay tallaabo ka qaaddo codsiga dhagaysiga 10 cisho gudahooda kaddib marka codsiga dhagaysiga la helo. Sharaxadda waa in ay ku jirto warbixin ay kooxda IEP ku eegayaan fursadaha kale, sababta ay fursadahaas lagu diiday, warbixin kasta ee nidaamka qiimaynta, qiimaynta, xogta, ama warbixinta ay degmadu u isticmaalayso

tallaabooyinka la soo jeediyay ama la diiday, iyo warbixin xaaladaha muhiinka ah fikradaha degmada ama go'aanka diidmada.

Degmadu waxa ay ku adkaysan kartaa in codsiga uusan qancinayn shuruudaha gobolka hoosimaanaya. Codsashada dhagaysiga waxaa la qaadanayaa in ay ku filantahay waa haddii dhinaca ogaysiiska codsiga helay aanu sheegi sarkaalka dhagaysiga ayadoo qoraala muddo 15 cisho gudahooda kaddib marka la helo codsiga kaasoo la rumaysanyahay in aysan qancin xeerka sharciga. Sarkaalka dhagaysiga waa in uu go'aamiyo haddii uu qancinayo xeerka sharciga muddo 5 cisho gudahooda marka la helo codsiga iyo dhinacyada lagu wargaliyo.

Kaddib marka aad heshid codsigaaga dhagaysiga, degmada waa in ay kuu soo dirto jawaab qoraala ee ka hadlaysa xaaladaha aad ka sheegtay dhagaysiga muddo 10 cisho gudahooda kaddib marka codsiga la helo.

Siidaynta Caddayn Dheeraada ee Dhacaysa Dhagaysiga Kahor

Shir dhagaysiga ka horreya waa in lagu qabto muddo 5 cisho ee maalmaha la shaqeeyo gudahooda taariikhda uu madaxa sarkaalka dhagaysiga. Shirkan waa in la qabto ayado dadka ay wada imaanayaan, goob ka tirsan degmada, ama telefoon lagu qabto. Ugu yaraan 5 cisho oo la shaqeeyo kahor inta aan dhagaysiga dacwadda la qaban adiga iyo degmada waa in uu dhinacba uu dhinaca kale u siidaayo dhammaan qiimaynta ilmahaaga oo dhan ee la dhammaystiray taariikhdaas iyo talooyinka ku salaysan qiimayntaas oo looga danleeyahay in lagu isticmaali doono dhagaysiga. Sarkaalka dhagaysiga ayaa dhici karta in uu diido in uu oggolaado in la soo dhexgaliyo qiimayn ama baaritaano dhagysiga ayadoon oggolaasho laga haysan dhinaca kale.

Go'aanka Dhagaysigan

Go'aanka dhagaysiga waa in la soo saaro iyo la siiyo dhinac kasta muddo 45 cisho maalmahadiga ah, ama muddo dheerada ee ku habboon oo lagu daray, kaddib marka wakhtiga 30 cisho ee la qabtay laga gudbo muddada go'aanka kaddib marka dhagaysiga dacwadda cabashada ay heshay hay'adda gobolka. Sarkaalka dhagaysiga waxa uu kordhin karaa muddada 45 cisho haddii ay codsadaan labada dhinac midkood haddii qaddiyad sax xogta lagu helo. Sarkaalka dhagaysiga waa in uu ku hagaa dood hadal ah dhagaysi wakhtiga iyo goobta sida ugu macquulsan ugu habboon adiga iyo canuggaaga. Sarkaalka dhagaysiga go'aankiisa haddii uu canuggaaga helayo FAPE waa in ay ku salaysantahay caddaynta iyo doodda si toosa ula xariirta FAPE. Go'aanka dhagaysiga waa kamadambays waa haddii adiga ama degmada aydan xaraysan tallaabo madani ah. Sarkaalka dhagaysiga ma laha awood uu ku baddalo go'aanka waa haddii uusan jirin qalad dhinaca karaaniga ama qaladaad xisaabta ah.

Codsiyo Gaara ee Dhagaysiga Dacwadda

Xaq ayaad u leedahay in dacwado gaara in aad ka xarayso xaalad ka duwan midda dhagaysiga dacwadda horay loo xareeyay.

DACWADDA IYO DIIWAANKA DHAGAYSIYADA

Go'aamda kama dambaysta ah ee cabashooyinka waxbarashada qaaska iyo dhagaysiga dacwadda waa mid dadwaynaha ay ka heli karaan shabakadda internetka ee MDE si ay dadka u eegaan. MDE

waxa ay haysaa diiwaanka guud ee la yiraahdo Cabashooyinka, Dhagaysiyada iyo Qalabka Warqadaha Soo Saaraya. Go'aamada waxay ku jiraan diiwaanka iyo waxaa laga saarayaa macluumaad kasta ee qofka tilmaamaya. Diiwaankaan waxaa laga helayaa shabakadda interneta ee Adeecidda iyo Gargaarka ee MDE ee laga galayo: http://w20.education.state.mn.us/WebsiteContent/ComplianceSearch.jsp.

TALLAABO MADANI AH

Marka adiga ama degmada ay qilaafto natiijooyinka ama go'aamada uu sameeyay sarkaalka dhagaysiga, labada dhinac midkood waxa uu xaraysan karaa tallaabo maxkamadeed. Tallaabada waxaa la horgayn karaa maxkamad federaala ama maxkamadda racfaanka ee gobolka. Xeerar kala duwan ee dib u eegid ah ayaa laysaga rabaa maxkamad kasta. Racfaanka loo dirayo maxkmadda racfaanka gobolka waa in lagu diro muddo 60 cisho gudahooda oo laga soo bilaabo manta la gaaray go'aanka. Racfaan loo dirayo maxkamadda racfaanka federaalka waa in lagu sameeyo muddo 90 cisho gudaheeda ee taariikhda go'aanka la gaaray.

MEELAYNTA INTA DHEGAYSIGA AMA TALLAABADA MADANIGA AY SOCOTO

Inta dhagaysiga ama tallabada maxkamadda lagu jiro, waa haddi aydan adiga ama degmada si kale ugu heshiin, ilmahaaga waxaa uu sii joogayaa meelaynta wasbarashada halkaas oo asaga/ayada ay hadda ku meelaysantahay waana in aan loo diidin galitaanka hore ee dugsiga. Tan caadi ahaan waxaa loo yaqaanna qaanuunka "stay-put" (meesheeda lagu dhaafo).

Waxa jira laba xeer oo ka reeban "stay-put" (meesheeda lagu dhaafo) ayaa jira:

1. Waxaa dhici karta in ardada laga wado rugtooda waxbarashada muddo aan ka badnayn 45 cisho ee maalmaha dugsiga ee lagu meeleyo waxbarashada kumeelgaarka wax la xariiro hub, maandooriye ama dhaawac jirka xadgudub loogu geystay: iyo

2. Sarkaalka dhagaysiga go'aankiisa uu adiga kula dhinac noqdo in baddalad meelaynta ay tahay wax habboon sida meelaynta "meeshaada joog" marka racfaan kale la codsado.

DHAGAYSIYADA LA DEDEJINAYO

Adiga (waalidka) ama degmada waxa aad codsan kartaan dhagaysi degdegsan marka ay xaaladaha soo socda ay jiraan:

1. Markasta uu muran ka jiro degmada *fikraddeeda* ay ku bilaabayso ama ay ku baddalayso aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarashada ee canuggaaga ama degmada helitaankeeda FAPE ee canuggaaga la siinayo;

2. Markasta uu muran ka jirao degmada diidmadeeda ay ku bilaabayso ama ay ku baddalayso aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarashada ee canuggaaga ama degmada helitaankeeda FAPE ee canuggaaga;

3. Markasta aadan jeclaysan waxa go'aanka ku qoran: iyo

4. Markasta ay degmada rumaysantahay si wadidda meelaynta hadda jirta ee canuggaaga ay u badantahay in canuugaaga ama caruur kale ay ku dhaawacanto.

Adiga ama dugsiga degmada waxa aad xaraysan kartaan codsi qoraala ee dhagaysiga dacwad degdegsan sida kor ku xusan.

Muddooyinka la Qabanayo Dhagaysiyada Degdegsan

Dhagaysiyada degdegsan waa in lagu qabto mudo 20 cisho gudahooda ee maalmaha dugsiga ee taariikhda kaddib marka codsiga la xareeyay. Sarkaalka dhagaysiga waa in uu go'aan kamadambays ah ka gaaro muddo 10 cisho gudahood ee dhagaysiga kaddib. Kulanka go'aanka waa in uu ku dhaco muddo 7 cisho gudahooda kaddib marka codsiga dhagaysiga la helo, waa haddii aadan adiga ama dugsiga degmada qoraal ku heshiin in uu midkiin ka tanasulo kulaanka go'aanka ama la isticmaalo nidaamka dhexdhexaadinta. Nidaamka dhagaysiga degdegsan waa la qaban karaa waa haddii aysan xalaadda noqon mid laga heshiiyay si qancinaysa labada dhinacba muddo 15 cisho gudaheeda kaddib marka codsiga la helo.

Burburinta Dacwadda

Haddii dugsiga degmada uusan awoodin in uu helo ka qaybqaadashadaada kulanka wax lagu xallinayo ama dhexdhexaadina kaddib markii daadal caqligal ah la sameeyay iyo dugsiga degmada uusan oggolaaan in uu qoraal ku saamaxo kulanka, waxaa dhici karta in dugsiga degmada, gunaanadka mudada 30 cisho, sarkaalka dhagaysiga wuxu joojinaya cabashada aad soo gudbisay.

Meelaynta Sarkaalka Dhagaysiga

Waxaa dhici karta in sarkaalka dhagaysiga uu ilmaha u dhigo meel waxbarasho ee kumeelgaara illaa 45 cisho ee kalendarka haddii uu sarkaalka dhagaysiga uu go'aamiyo in ilmahaaga ay dhici karto in uu isdhaawaco ama uu dad kale dhaawaco haddii asaga/ayada u sii joogayo meesha hadda lagu meelayay.

Xaqa Racfaanka laga Qaato Go'aanka

Adiga ama degmadu waxa aad racfaan ka qaadan kartaan go'aanka sarkaalka dhagaysiga ee sida deg-degsan loo dhagaystay.

MEELAYNTA WAXBARASHADA DUWAN EE KUMEELGAARA

Waxa dhici karta in ay degmagu baddasho meelaynta canuggaaga waxbarashadiisa illaa 45 cisho ee maalmaha dugsiga, haddii ilmahaaga:

1. Uu wato hub halis ah ama hub halis ah uu dugsiga ku haysto, ama ay socoto hawl dugsi sharci ahaan hoosimaanaya dugsiga degmada ama MDE sida ay ku qeexantahay sharciga federaaliga;

2. Si ula kaca dugsiga ku haysta ama isticmaala maandooriye sharci darra ah, ama iibiya ama ku qalqaaliya iibsashada maandooriyaha muddada dugsiga la joogo, ama ay socoto hawl dugsi

sharci ahaan hoosimaanaya dugsiga degmada ama MDE. Tani kuma ay jiraan qamri ama tubaako: ama

3. La gaarsiiyo halis jirka qof kale inta dugsiga la joogo, agagaarka dugsiga, dugsiga gudahiisa, marka hawalaha dugsiga lagu fulinayo sida sharci dugsiga degmada ama MDE ku qeexan sharciga federaaliga.

Taariikhda ay degmada go'aamiso in canuggaaga laga saaro iyo ka saaritaanku uu yahay baddalaad meelaynta canug naafonimo qaba kaddib marka la jabiyay qodob aqlaaqda ardayga, dugsiga degmada waa in uu ku soo ogaysiiyo go'aankaas, iyo adiga lagu siiyo nidaamka dhawritaanka ogaysiiska.

Kooxda IEP/IIIP ee go'aaminaysa halka lagu qabanayo waxbarashada ku-meelgaarka iyo adeegyada waxbarashada qaaska ah ee ku habboon. Inkasto tan ay tahay baddalaad ku-meelgaara, waa in ay canuggaaga u oggolaato:

1. La sii wado in uu ka qaybqaato machadka waxbarashada guud iyo horumarka qancinta ujeeddooyinka loo sameeyay IEPga ilmahaaga, inkasto ay ka dhacayso meel duwan: iyo

2. Ay ka mid yihiin adeegyada iyo isbaddallada loo sameeyay si looga hortago in ay dabci-gaara mar kale u dhicin.

Haddii ilmahaaga lagu meeleyo meel waxbarasho ee kumeelgaara, kulanka IEP/IIIP waa in lagu qabto muddo 10 cisho gudaheeda ee go'aanka lagu gaaray. Kulankaan, kooxda waa in ay ka wada hadasho dabciga iyo cilaaqadka ka dhaxeeya naafannimada ilmahaaga. Kooxdu waa in ay dib u eegto macluumaadka qiimaynta ee la xariirta canuggaaga aqlaaqdiisa, iyo go'aan laga gaaro ku haboonaanta IEP/IIIP iyo qorshaha aqlaaqda canuggaaga. Kooxda waxa ay go'aan ka gaaraysaa haddii dhaqanka canuggaaga uu sababay, ama cilaaqaad toosa la leeyahay naafonimadiisa ama naafonimadeeda, ama aqlaaqda canuggaaga ay sii toosa ula xariirto dugsiga degmada uu gabay hirgalinta IEP).

QAREENKA UJRADIISA DHEGAYSIGA

Waxaa dhici karta in laguu soo celiyo ujrada qaarkeed ee qareenka kaaga baxday haddii aad dacwadda ku guulaysatid. Waxaa dhici karta in garsooraha uu ujrada qareenka soo gooyo taaso ku xiran sicirka ka jira jaaliyaddaada. Waxaa dhici karta in ay Maxkamaddu ay hoos u dhigto qareenka ujradiisa haddii ay soo ogaato in aad si aan caqligal u ahyn dib ugu dhigtay dhicitaanka heeshiska ama go'aanka kiiska. Haddii degmada ay guulaysato Maxkamadduna ay oggolaato in dhagaysigaagu uu ahaa sababo kasta ee ujeeddo qaldan, waxaa dhici karta in degamda kharashkiisa ee qareenka in aad adiga bixiso.

KA REEBITAANKA IYO KA SAARIDDA CARUUR NAAFONIMADA QABA

Kahor inta uusan canuggaga nafonimada qaba laga saarin karin ama laga reebi karin dugsiga, jiritaanka go'aanka waa in la qabto. Haddii canuggaaga aqlaaq xumadiisa uu la xariiro naafonimadiisa ama naafonimadeeda, canuggaaga lama cayrin karo.

Marka canug naafonimada qaba la reebo ama la cayriyo sida uu qorayo Pupil Fair Dismissal Act, Minnesota Statutes Sections 121A.41-56, sababo la xariira aqlaaqdarro uu muujiay canuggaaga naafonimadiisa, degmada waa in ay sii bixiso waxbarashada qaaska ah iyo adeegyada la xarira kaddib marka uu dhammaato muddada cayritaanka, haddii mid ay jirto.

KA SAARITAANKA AQLAAQDA LA XARIIRA

Haddii canug nafoonimada qaba laga saaro meelayntiisa waxbarashada uu haddda haysto, tan waxaa loo qaadanaya baddalaad ka jirta meelaynta haddii:

1. Muddda ka saaridda ay ka badanthay 10 cisho ee maalmaha dugsiga la aado ee isku xiga: ama

2. Canuggaaga la soo mariayay saritaanno dhowr ahoo joogto noqday sababtoo ah:

    a. Wadarta ka saaritaannada badan ee ka badan 10 cisho ee sanad dugsiyeedka;

    b. Canuggaaga aqlaaqdiisa ay si weyn u shabbahdo caqlaaqdiisa ee shilalkii hore kuwaasoo sababay ceyritaanno dhowr ah: iyo

    c. Xaalado dheeraada sida dhererka cayritaanka, wadarta muddada canuggaga la cayriyay, iyo isu dhawaanta muddada cayritaannada isugu xigaan.

Go’aaminta in cayritaannada dhowrka ah ay noqonayaan baddalaad meelaynta ah waxa samaynaya degmada. Haddii go’aankan laga horyimaado iyo uu noqdo mid u baahan dib u eegid sharciga loo marayo iyo nidaamdaha garsoorka.

CARUURTA AAN LOO AQQONSAN IN AY U QALMAAN WAXBARASHADA KHAASKA IYO ADEEGYADA LA XARIIRA

Haddii canuggaaga la caddeyay in uusan u qalmin waxbarashada qaaska iyo adeegyada la xarira iyo jabiyo xeerka aqlaaqda caruurta, iyo dugsiga degmada ay horay u ogayd aqlaad darrada canuggaaga in canugga uu ahaa mid naafonimo qaba markaa canuggaaga waxa uu ka faaidaysan karaa difaacyada kor ku xusan.

Degmada waxaa loo qaadaanaayaa in ay aqoon u leedahay in canuggaaga uu yahay canug naafonimo qaba haddii, wixii ka horreeyay aqlaaqda kalliftay in tallaabooyin aqlaaq ah laga qaado falalka dhacay awgood:

1. In aad walaac ku muujisay qoraalka aad u dirtay maamulka ama shaqaalaha agaasinka ee degmada ama baraha canuggaaga in canuggaaga uu u baahanyahay waxbarashada qaaska iyo adeegyada la xariira;

2. Adiga aad codsatay qiimayn la xariirta u qalmidda waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira ee Qaybta B ee IDEA: ama

3. Canuggaaga barahiisa ama shaqaalaha degmada waxa ay ka muujiyeen walaacyada qaaska ee la xariira kuna saabsan aqlaaqda isdabajoogga ah ee canuggaaga uu muujiyay ee si toosa loogu gudbiyay maamulaha degmada ee waxbarasahda khaaska ama korjoogayaal kale ee degmada.

Ka reebitaanka degmada ogaanshaheeda

Degmada lagama filayo in ay hayso aqoontaaso kale haddii:

1. Haddii aad horay ugu diidday oggolaasho qiimayn ah ee canuggaaga ama haddii aad horay u diidday adeegyada waxbarashada khaaska: ama

2. Canuggaaga horay loo qiimayay go'aanna lagu gaaray in uusan ahayn canug naafonimo qabin marka la eego Qaybta B ee IDEA.

Xaaladaha la eegayo haddii aysan jirin aqoonsasho

Haddii aysan degmadu aqoonsanayn in canuggaga uu yahay mid naafonimo qaba kahor inta aan tallaabooyinka aqlaaqda laga qaadin canuggaaga, canuggaaga waxa ay u badantahay in la soo mariyo waxyaabaha la marinayo caruurta aan naafonimada qabin marka ay ku kacaan waxyaabo aqlaaq ah kuwaa la mida.

Haddii codsi la sameeyey si lagu qaado qiimaynta canuggaaga inta lagu jiro muddada canuggaaga tallaabo aqlaaq laga qaadayo, qiimayntu waa in qaab degdegsiya lagu sameeyo. Illaa qiimaynta la dhammaystiro, canuggaaga waxaa lagu hayn doonaa meelayn ay degmada go'aamisay, kuwaaso ay ku jiraan hakinta ama cayrin aan lahayn adeegyada waxbarashada. Halkaan Minnesota, adeegyada waxbarashada khaaska ah waxaa la siiyaa maalinka 6^{aad} ee hakinta iyo la siiyo adeegyada waxbarashada ee duwan.

FARISTA TALAABO AY QAADAYAN BOLIISKA IYO MAAMULKA GARSOORKA EE MEELAYNTA

Degmada waxa ay ka warbixin kartaa dambi uu galay canug naafonimo qaba ee loo sheego hayadaha ku habboon ee boliiska Gobolka iyo maamulka garsoorka si masuliyaddooda wax uga qabtaan ayagoo dhawraya sharciyada dambiyada uu galay canug naafonimada qaba.

Xoga la Gudbiyay

Haddii degmadu gudbiso dambi uu galay canug naafonimada qaba, degmadu waa in ay hubiso in koobiyada canugga waxbarashadiisa khaaska ah iyo anshax ama aruurinta loo diro maamullada ku habboon kuwaaso dembiga loogu dirayo s tallaabo ay uga qaadaan. Laakiin, degmadu waxa kaliya oo ay diri doonta koobiyada canuggaaga waxbarashadiisa khaaska ah ee keliya iyo xogta anshaxmarinta illaa heerka ay oggoshahay FERPA.

MEELAYNTA DUGSIYADA GAARKA LOO LEEYAHAY

IDEA ugama baahna in ay degmadu bixiso kharashka waxbarashada canugga, ay ku jiraan waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira, kuwa dugsiyada gaarka haddii degmada ay FAPE u

diyaarisay canuggaaga iyo in ay canuggaaga ku meelayso dugsi gaar loo leeyahay. Laakiin, waxaa dhici karta in laguu soo celiyo lacagta kaaga baxday waxbarashada meelaynta dugsiga gaarka loo leeyahay haddii aad adiga degmada ku wargalisay ujeedaada ah in aad canuggaga ku qortid dugsi gaar loo leeyahay oo dawladduna qarashkiisa kabayso waqti cayiman iyo haddii sarkaalka dhagaysiga uu ogaado in degmadu aysan sida ugu dhaqsiya badan FAPE ugu diyarin canuggaaga kahor inta aan canuggaaga lagu qorin dugsiga gaarka loo leeyahay haddii ay meelaynta dugsiga gaarka loo leeyahay ay ku habboontahay. Waa in aad adiga degmada u sheegtaa in aad rabtid in aad canuggaaga ku meelayso meel gaar loo leeyahay ayadoo ay dawladda kharashka bixinayso iyo kulankii ugu dhawaa ee IEP/IIIP kahor inta aan canuggaaga laga saarin dugisyada guud ugu yaraan

Ogaysiiskaaga waa in aad ku sheegtid sababta aad ku qilaaftay IEP/lllP ay degmada soo jeedisay ama meelaynta. Haddii sarkaalka dhagaysiga ee maxkmadda uu ogaado in degnadu ay qaldantay in ay bixiso ama aysan bixin karin waxa waxbarashda canuggaga ku habboon iyo in waxbarashada gaarka ay ku habboontahay, waxaa dhici karta in adiga laguu celiyo kharashka kaaga baxay meelaynta gaarka. Guuldarrada ka timaadda in aanan dugsigaaga loo sheegin isku qorista canuggaaga ee dugsi gaar loo leeyahay dawladduna ay kharashka bixinayso, guuldarrada ka timaadda marka canuggaaga aad u samayso qiimayn kahor inta aadan ku meelayn dugsi gaar loo leeyahay kaddib marka degmada ay ku siisay ogaysiis lagu doonayo in lagu qiimayo canuggaaga, ama ay jiraan dib u dhacyo kale ee aan macno lahayn ee dhinacaaga ka yimaada waxa ay sababi karaan in la dhimo ama laguu diido lacag celinta loogu talagalay meelaynta dugsi gaar loo leeyahay.

Sarkaalka dhagaysiga ma u dhimi karto ama ma diidi karo lacag celinta haddii: degmada ay ka hortimid in adiga lagu siiyo ogaysiiskan; aan adiga lagu siin ogaysiiska masuuliyadahaaga sida lagu qoray shuruudaha kore ee qaybtan; ama haddii cabashada shuruudaha kor ku xusan ay natiijadooda keenayso dhaawac loo gaysto canuggaaga iyo haddii aad ku guuldarraysatay in lagu siiyo ogaysiiska loo baahna sababtoo ah adiga af ingiriis aan qori karin ama haddii cabashada shurudaha kore la socota ay dhalin karto halisyo weyn ee xagga qiirada in canuggaaga loo gaysto.